



Kiniinka ka hortagga uurka

Dienorette[®]

dienogest 2 mg/etinylestradiol 0,03 mg

Dienorette®

Waxa lagu qoray **Dienorette®**, taas oo ah kaniinka ka hortagga uurka ee isku dhafan. Waxay taas micnaheedu tahay inay ku jiraan laba nooc oo hormoonno ah: oestrogen (ethinylestradiol) iyo gestagen (dienogest).

Waxaa uu kaniiniga isku dhafka ee uur joojinta kaga hortagaa dhowr siyaabood:

- Ugxan qubista ka dhacaysa ugxansidahu aanay dhaceynin
- in xuubka ilmo galeenka uu ciriiri ahaado oo aanu dhiig badan laheyn, taas oo ka hortageysa inay ukunta la bacrimiyay ku dhagto
- dheecaanka afka ilmo-galeenku waxa uu noqon doonaa mid dhumuc weyn oo adag tahay inay shahwadu ka gudubto

Dienorette® waxa loo isticmaalaa:

- ka hortagga uurka
- daawaynta finanka marka ay wax katari weyso daweynta deeganka laga helo ama antibiyootigu aanay waxba ka tarin xaalada maqaarka ee haweenka doortay inay kaniinka ka hortagga uurka isticmaalaan.

Dienorette® warqada baakada dawada

Waxa baakad kasta oo kaniin ah ku jira 28 kaniini. 21-ka kaniini ee ugu horreeya ee cadaanka ah (safafka 1–3) waxa ku jira hormoonno, halka 7-da kaniini ee ku xiga ee cagaaran (safka 4) ay bilaa hormoonno yihiin. Waa muhiim inaad marka hore 21-ka kaniin ee cad aad qaadatid, oo aad ka dibna 7 maalmood qaadatid kaniinada cagaarka ee bilaa bormoonnada ah.

Qaado kiniinka ay ku dhigan tahay maalinta hadda ee todobaadka (lagugu tusaayo sharootada xabagta leh aad ku dhajineyso bushqada kiniinka, sida tilmaamaha waafaqsan). **Tusaale ahaan, haddii aad bilowdo inaad kiniinka qaadato maalin Jimce ah, qaado kaniiniga lagu calaamadiyay FRE (FRE waa lugada Swedishka oo laga wado Jimco)** adigoo kiniinka ku soo riixaaya dahaadhka aluminiumka ah. U qaado hal kaniini maalin kasta, nidaamka loogu kala horeysiiyey sharootada bushqada ee baakada kiniinka ku taala.




Bilow inaad isticmaasho Dienorette®

Dienorette® waa in maalin kasta qiyaas ahaan wakhti isku mid ah la qaataa. Waxa uu Jadwalka hoosta ku yaalaa kuu sharaxayaa sida loogu bilaabaayo **Dienorette®** iyadoo meelo kala duwan oo laga bilaabo la joogo.

Aan hore loo qaadan wax ka hortagga uurka oo hormoon ku saleysan	Ka soo bedelanaaya kiniinka ka hortagga uurka ee isku dhafan ee hormoon ku saleysan	Ka soo bedelanaaya cinjirka xubinta taranka ama balastarka ka hortagga uurka	Ka soo bedelanaaya kaniinka ka hortagga uurka ee ay kaliya gestagen ku jirto	Ka soo bedelanaaya irbad ama hormoonka IUD
Bilow inaad isticmaasho Dienorette® maalinta koowaad ee dhiiga caadada kugu dhaco (maalinta dhiigu kaa imanaayo).	Bilow inaad isticmaasho Dienorette® maalinta ka danbeysa ee aad qaatay kiniinka waxtarka leh ee ugu danbeeya kiniinka adiga kiniinka ka hortagga uurka ee isku dhafan ee hore loo isticmaali jirey.	Ka bilow Dienorette® isla maalinta aad ka saarto cinjirka xubinta taranka ama balastarka ka hortagga uurka.	Waxaad ka soo bedelan kartaa kaniinka ka hortagga uurka ee kaliya ku jira gestagen adigo ku badalanaya Dienorette® markaad rabto.	Bilow inaad isticmaasho Dienorette® isla maalinta aad usha balastiga ah ama hormoonka IUD iska saartey, ama markay ay gaadho wakhtigii irbada kale.
			FG! Istickmaal waxyaalaha kale ee la isku illaaliyo oo dheeraad ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) inta lagu jiro 7 maalmood ee ugu horeeya ee aad bilowdo inaad isticmaasho Dienorette®	FG! Istickmaal waxyaalaha kale ee la isku illaaliyo oo dheeraad ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) inta lagu jiro 7 maalmood ee ugu horeeya ee aad bilowdo inaad isticmaasho Dienorette®

Raac talada aad ka helayso dhakhtarkaaga/umulisadaada haddii aad billoowdo inaad isticmaasho kiniinka ka hortagga uurka ka dib markaad isticmaasho kiniinka ka hortagga uurka ee degdega ah, aad ilmo iska soo tuurayso, aad umulayso, ama si aad si "degdeg ah ugu billoowdo".



Dhiig baxyada

Dhiigbax dhexdhexaad ah

Inta lagu jiro bisha koowaad ee aad bilowdo inaad isticmaasho **Dienorette®**, waxa laga yaabaa inaad yeelato dhiigbax aan caadi aheyn. Dhiigbaxyadaas aan caadiga aheyn waxay istaagi doonaan marka uu jidhkaagu la qabsado kiniinka ka hortagga uurka (caadi ahaa 3 bilood ka dib). Dhakhtarkaaga/umulisadaada la xidhiidh haddii dhiig baxu uu noqdo mid ka sii xoog badan (sida dhiigaaga caadada oo kale), ama haddii uu sii socdo dhowr maalmood.

Miyaad dooneysaa inaad dib u dhigto marka uu dhiiga caadadu kaa yimaado?

Waxaad dhiigaaga caadada dib ugu dhigi kartaa adigoo kaliya qaadanaaya kiniinka daawadu ku jirto ee cadaanka ah uun (aan aheyn kiniinada cagaaran ee macmalka ah ee safka afraad), oo aad ka dibna isla markiiba bilowdo baakad kiniinka ah oo cusub ee **Dienorette®** oo aad wada dhammaysatid dhammaan baakada kiniinka ee cusub. Waxa laga yaaba inaad yeelato dhiigbax khafiif ah ama mid kii caadada oo kale ah markaad bushqada labaad ee kiniinka qaadaneyso. Dhamee baakada labaad ee kiniinka adigoo 7 kiniin ee cagaarka ee safka afraad ku jira qaadanaaya. Ka diban bilow baakada kiniinka ee ku xigta. La hadal dhakhtarkaaga/umulisadaada haddii aanad hubin.

Miyaad hilmaantey inaad kiniinka qaadato?

Haddii wax **ka yar 12 saadood** ay ka soo wareegeen ka dib markii aad kaniinka hilmaamtey, waxtarka ka hortagga uurka ee **Dienorette®** ma sameyn doonto. Kiniinka waa in la qaataa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah, waa in ka dibna kaniinkii ku xiga la qaataa wakhtigiisii caadiga ahaa.

Haddii wax ka **badan 12 saacadood** laga soo gudbay, waxaa hoos u dhici karta waxtarka kaniiniga kahortaga uurka. Waxay saamaynta ka hortagga uurku ku xiran tahay meesha aad baakada ka joogto (todobaadka) aad hilmaantey inaad kiniinka qaadato. Wax micno ah ma laha haddii aad hilmaantay inaad qaadato mid ka mid ah kaniiniyada macmalka ah ee cagaarka. Xaaladaas oo kale, iska tuur kiniinka la hilmaamay.

Muhiim! Khatarta inaad uur yeelato ayaa ka sii weyn marba marka ka danbeyo oo aad himaanto kaniinigi lagaa rabay in aad qaadato, iyo sidaad ugu dhowdahay dhammaadka baakada (kiniinnada cagaaran) markaad inaad qaadato hilmaanto. Haddii aad 2 ama wax ka badan oo kaniini ah hilmaanto inta lagu jiro todobaadkaaga ugu horeeya ee aad isticmaalayso (kiniinnada cadaanka ah), waxa la isku soo jeedinayaa inaad dhakhtarkaaga/umulisadaada la xiriirto si aad talo u hesho.

Miyaad hilmaantey inaad kiniinka qaadato inta lagu jiray asbuuca koowaad?

Qaado kiniiniga aad hilmaantay isla markiiba marka aad xasuusato, xataa haddii tani micnaheedu yahay inaad qaadato labo kiniini isku mar. Isticmaal waxyaalaha kale ee la isku illaaliyo oo dheeraadka ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) 7 maalmood ee xiga. Sii wada kiniinada ku jira baakada. Isticmaal kaniiniga ka hortagga uurka ee degdega ah haddii aad galmo samaysay shantii maalmood ee la soo dhaafay gudahood.

Miyaad hilmaantey inaad kiniinka qaadato mudada xilliga todobaadka labaad gudahiisa?

Qaado kiniiniga aad hilmaantay isla markiiba marka aad xasuusato, xataa haddii tani micnaheedu yahay inaad qaadato labo kiniini isku mar. Kaniiniyada qaado waqtiga aad qaadan jirtay. Kaniiniga ka hortagga uurka ayaa weli lahaan doona saameyntii la rabay, waase haddii aad kaniinka u qaadatay sidii loogu talagalay 7 maalmood ee ka horeeyay markaad kiniinka hilmaantey, oo uma baahnid inaad difaac dheeraad ah isticmaasho. Hase yeeshee, haddii aad seegtay qaadashada wax hal kaniin ka badan, waa inaad isticmaashaa ka hortagga uurka oo dheeraad ah (tusaale ahaan cinjirka galmada) muddo 7 maalmood ah.

Miyaad hilmaantey inaad kiniinka qaadato mudada xilliga saddexaad gudaheeda?

Waxaad kala *dooran* kartaa mid uun fursadahan soo socda. Uma baahnid inaad isticmaashid ka hortag uurka oo dheeraad ah, waase haddii aad kaniinka u qaadatay sidii loogu talagalay 7 maalmood ee ka horeeyay markaad kiniinka hilmaantey:

1. Qaado kiniiniga aad hilmaantay isla markiiba marka aad xasuusato, xataa haddii tani micnaheedu yahay inaad qaadato labo kiniini isku mar. Kaniiniyada qaado waqtiga aad qaadan jirtay. Halkii aad ka qaadan laheyd kiniinka cagaaran ee macmalka ah ee bushqadaas, iska tuur oo bilow bushqada ku xigta.

Ama

2. Waxaad sidoo kale joojin kartaa daawayntaada kaniinka waxtarka leh ee cadaanka ah oo aad si toos ah ugu aadi kartaa kiniinada macmalka ah ee cagaarka ah (laga bilaabaayo maalinta aad illowday inaad kaniinkaaga qaadato). Markaas ka dib bilow inaad isticmaasho baakad cusub. Haddii aad rabto inaad baakad cusub bilowdo maalinta kuu go'an ee bilawga, kiniinka macmalka ah isticmaal wax 7 maalmood ka yar.

Haddii aad leedahay calool shuban ama matag badan

Haddii aad matagto 3–4 saacadood gudahood ka dib markaad kaniinka qaadatey, ama haddii uu shuban daran kugu dhaco, maadada dawada ee **Dienorette®** ku jirta aanu jidhku saani u wada nuugi doonin. Xaaladani waxay la mid tahay uun sidii oo la hilmaamay in kiniin la qaato. Markaad matagto ama shubanto ka dib, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan kaniin cusub ugala soo baxdaa baakada kaydka ah. Haddii ay suurtagal tahay, kaniinka qaado 12 saacadood gudahood marka laga bilaabo wakhtiga caadiga ah ee aad kaniinka qaadato. Haddii aanay taasi suurtoogal aheyn, ama haddii 12 saacadood ay ka soo wareegeen, waa inaad raacdo tilmaamaha la midka kuwa lagu bixiyey "Miyaad hilmaantey inaad kiniinkaaga qaadato?"

Waxyaalaha muhiimka ah ee in laga fikiro u baahan!

Sida hormoonnada kale ee ka hortagga uurka oo kale, ayaanay **Dienorette®** kaa ilaalin karin HIV (AIDS) ama cudurrada kale ee galmada lagu kala qaado. Sidaa darteed, waa inaad cinjirka galmada isticmaasho si aad difaac dheeraad ah oga hesho haddii aad galmo lammaane cusub la samaynayso.

Saameynta xun

Sida kiniinada kale ee ka hortagga uurka si lamida ah ayay **Dienorette**® keeni kartaa saameyn xun, laakiin dadka isticmaala oo dhami ma wada yeeshaan kuwaas. Saameynta xun ee ugu badan ee la soo sheego waxa ka mid ah madax xanuun, laabta oo ku xanuunta. Saameynta xun ee aan badiyaa la yeelan waa tusaale ahaan wareega caadada oo aan joogto aheyn ama baaqda iyo isbadeladal muudhka. Si aad u ogaato xog ku saabsan saameynaha xun ee kale ee daawada, fadlan akhri warqada baakada daawada. Saameynta xun ayaa badiyaa iyadu kaligeed iska tagta, laakiin waxa la iskugula talinayaa inaad la xiriirto dhakhtarkaaga/umulisadaada.

Dawooyinka ka hortagga uurka iyo halista xinjirowga dhiigga ee isku dhafan

Waxa ay khatarta xinjirowga dhiigga aad u badan tahay marka la isticmaalayo kiniinka ka hortagga uurka ee isku dhafan, xitaa haddii ay guud ahaan khatartu yar tahay. Waxa muhiim ah in aad garanayso xaaladaha sii kordhinaaya halista xinjirowga dhiigga, nooca calaamadaha ee aad yeelan karto, iyo waxa la sameynaayo haddii aad xinjirowga dhiigga yeelato.

Waxa ay khatarta xinjirowga dhiigga aad u badan tahay:

- mudada lagu jiro sanadka ugu horeeya ee aad kiniinada ka hortagga uurka isticmaalayso ama marka aad hadana dib ugu billoowdo inaad kaniinka isticmaasho ka dib maraad ugu yaraan 4 toddobaad ka nasatay
- haddii miisaankaagu saa'id u badan yahay
- haddii aad 35 jir ka weyn tahay
- haddii qof qaraabo kugu dhow ahi uu xinjirowga dhiiga lahaa
- haddi aad umushay dhowrkii todobaad ee ugu danbeeyey gudahood
- wixii ku lugta leh waxqabad xagga qalliinka
- haddii ay dhaqdhaqaaq yaraani timaado (muddo dheer sariirta aan ka kici karin, balaster lagu xiray adin ku jaban)

Haddii aad cabto sigaarka oo aadna 35 jir ka weyn tahay, waxa jira sababo dheeraad ah oo dhakhtarkaaga lagula hadlaayo si aad ugu hesho talo ku saabsan joojinta sigaarka ama waxyaalaha kale ee ka hortagga uurka.

Haddii aad yeelatid calaamadahan mid ka mida ah isla markaasba la xiriir khakhtarkaaga:

- xanuun xun ama barar cududaada ama lugtaada ah
- xanuun hawo mareenada oo degdeg kuugu yimaada oo aan waxa keenay la garaneynin ama habdhaca neefsashada oo sii kordha, laabta oo aad kuu xanuunta ama qufac aad si degdeg ah u yeelato
- xanuun laabta, badiya lama filaan ah
- murqaha oo daciif ku noqda ama dareenka oo wejiga, cudud, ama luga ku kacsan (gaar ahaan haddii uu kani hal dhinac yahay), hadalka ama fahamka oo kugu adkaada, jaha wareer degdeg kuugu yimaada, aragga oo si degdeg ah kaaga luma ama aanad saani waxba u arkeynin, madax xanuun daran/dhanjaf sidii caadiga ahayd ka sii xanuun badan

Fiiri FASS wixii macluumaad dhan ee ku saabsan Dienorette®: www.fass.se

Si taxadir leh xaashida baakadaha u akhri ka hor inta aanad isticmaalin Dienorette®.
Waxa ku jira macluumaad adiga kuu muhiim ah.

Dienorette® Dienogest/ethinylestradiol, 2 mg/0.03 mg, kiniino dahaaran. Daawo warqada dhakhtarku qoro oo kaalmo leh. **Calaamadaha:** Ka hortagga uurka iyo finanka waxoogaaga. **Kuurada:** Hal kiniin maalin kasta. **Digniino/taxadir:** Ha isticmaalin Dienorette® haddii aad qabto ama laga shakisan yahay inaad kansar qabtid, aanad u adkeysan hormoonnada galmada, aad leedahay xinjirowga dhiigga oo xididdada dhiigga ama sambabada kaaga yaala, shaqada beerka oo daciif ah, kelyaha oo istaagey, ama dhiig baxa farjiga ah oo aan la garaneynin. Isla markiiba la soo xidhiidh dhakhtarkaaga ama umulisadaada haddii aad isku aragto wax kasta oo calaamado aan caadi ahayn ah, sida xanuun aan la garanayn oo laabta, caloosha ama lugaha ah. Warqada baakada dawada waxa ku jira macluumaad ku saabsan arrimaha khatarta ah iyo calaamadaha xinjirowga dhiigga, iyo macluumaadka ku saabsan xaaladaha ay tahay inaad isticmaalka Dienorette® joojiso, ama haddii ku kalsoonaanta Dienorette® laga yaabaa inay hoos u dhacdo. **Saameynta xun:** Madax xanuun iyo naasaha oo ku xanuuna. Dumarka isticmaala hormoonnada ka hortagga uurka qaarkood, kuwaas oo ay ku jirto Dienorette®, ayaa soo sheegay in ay la kulmeen diiq ama dareen aan fiicnayn. Haddii aad dareento in muudhkaagu is bade-lay, ama haddii aad dareento calaamado diiq oo kale ah, waa inaad isla markaaba la xiriirtaa dhakhtar/umuliso si aad talobixin caafimaad ugu hesho. Saameynaha xun ee kale ee daawada: ka eeg warqada baakada dawada iyo www.fass.se. Dienorette® waxa ku jira lactose. Macluumaad la soo gaabiyey oo ku salaysan warqada baakada dawada ee ku taariikhaysan 16/08/2022.

Haddii aad wax saameyn xun ah la kulanto, fadlan la hadal dhakhtarkaaga ama umulisadaada. Taasi sidoo kale waxay khuseysaa saameynta xun ee aan lagu sheegin macluumaadkan.

Xogta waxa hubiyay Kristina Gemzell Danielsson, Borofisoor ku takhasusay dhalmada iyo cudurada haweenka, Abriil 2018.